

Isbadalada Tababarka si Looga Jawaabo COVID-19

Hoos waxaad ka helaysaa jawaabta Waaxda Gobalka Waashington u qaabilsan Carruurta, Dhalinta, iyo Qoysaska (Washington State Department of Children, Youth, and Families' (DCYF) ee ku aadan tababarka si loo buuxsho heerarka ruqsad helida inta lagu jiro COVID-19. Kuwaani waa isbadalo kooban oo lagu hubinaayo helitaanka iyo awooda buuxinta shuruudaha inta lagu jiro waqtigaan. Shuruudaha buuxa waa in la buuxshaa xili danbe.

Shaqaalaha Cusub

Shaqaalaha dhawaan la shaqaalaysiiyay ayaa qaadan kara dookha lasoo gaabshay ama wax laga badalay ee shuruudaha hore ee tababarka si loo boobsiiyo awooda ay u leeyihiin inay kaligood la joogi karaan carruurta.

Tababarka	Isbadalada COVID-19
Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta	<ul style="list-style-type: none"> Nooca kumeelgaar aha, ee lasoo koobay ee Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta ayaa la heli karaa. <ul style="list-style-type: none"> Waxay qaadanaasaa ku dhawaad sadex saacadood in lagu dhameeyo. Oo lagu heli karo Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali. Waxaa oonleen looga heli karaa Barta Tababarka ee DCYF hoosta qaybta 'Tababarka Ku meel gaarka ah ee Caafimaadka iyo Badqabka ee COVID-19.' Waa qasab inaad dhamayso qaybta buuxda Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta ee sanad miisaaniyadeedka 2021-2022 (Luuliyo 1, 2021 - Juun 30, 2022). Dhamee tababarka buuxa ee Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta hadda. <ul style="list-style-type: none"> Dhammaan dookhyada hore ee halkaan ku qoran ayaa wali la heli karaa.
CPR	<ul style="list-style-type: none"> Dhamee tababarka CPR oo oonleen ah oo uu bixinaayo adeeg bixiye la ogol yahay. Marka dib loo furo tababarka tooska loo galaayo, dhamee tababarka si toos ah. Samee tababarka tooska ah oo shaqada lagu tababaranaayo (markuu jiro) markay haboon tahay si waafaqsan amarka deegaankaaga/wajiga dib u furida.
Gurmadka Degdega ah	<ul style="list-style-type: none"> Dhamee tababarka Gurmadka Degdega ah oo oonleen ah oo uu bixinaayo adeeg bixiye la ogol yahay. Marka dib loo furo tababarka tooska loo galaayo, dhamee tababarka si toos ah. Samee tababarka tooska ah oo shaqada lagu tababaranaayo (markuu jiro) markay haboon tahay si waafaqsan amarka deegaankaaga/wajiga dib u furida.
Jeermisyada Dhiiga Ka dhasha	<ul style="list-style-type: none"> Waxaa lagu samayn karaa oonleenka. Tababarka oonleenka ah wa ainuu buuxshaa shuruudaha tababarka Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Gobalka Washington (Washington State Department of Labor & Industries (L&I)).
Kaarka Shaqaalaha Cuntada.	<ul style="list-style-type: none"> Waxaa lagu samayn karaa oonleenka. Tababarka oonleenka ah waa inuu buuxshaa shuruudaha Waaxda Caafimaadka ee Gobalka Washington (Washington State Department of Health (DOH)).
Hurdo Badbaado leh	<ul style="list-style-type: none"> Samaynta tababarka ayaa ahaan doonii sidii hore: waxaa oonleen ahaan looga galayaa barta Tababarka ee DCYF. Waa inay maraan dadka ka shaqeeya barnaamijyada ruqsada u haysta daryeelka saqiirada.

Shaqaalaha Hadda shaqeeya

Shaqaalaha Hadda shaqeeya ayaa isbadalo lagu sameeyay tababarka ay galayaan sabab la xariirta COVID-19. Hoos waxaad ka helayaa isbadalada adeeg bixiyaasha hadda shaqeeya.

Tababarka	Isbadalada COVID-19
Tababarka Adeegga gudaha xarunta ah	<ul style="list-style-type: none"> Laga bilaabo Luuliyo 1, 2020, dhammaan adeeg bixiyaasha ayaa haysta 12 bilood inay ku maraan 10 saacadood oo tababarka adeegyada gudaha xarunta ah. Haddii aadan awoodin inaad marto tababarka mudada loo cayimay gudaheed, sug xog dheeraad ah oo soo bixi doonta xiliga gu'ga 2021.
CPR	<ul style="list-style-type: none"> Dhamee tababarka CPR oo oonleen ah oo uu bixinaayo adeeg bixiye la ogol yahay. Marka dib loo furo tababarka tooska loo galaayo, dhamee tababarka si toos ah.
Gurmadka Degdega ah	<ul style="list-style-type: none"> Dhamee tababarka Gurmadka Degdega ah oo oonleen ah oo uu bixinaayo adeeg bixiye la ogol yahay. Marka dib loo furo tababarka tooska loo galaayo, dhamee tababarka si toos ah.
Jeermisyada Dhiiga Ka dhasha	<ul style="list-style-type: none"> Waxaa lagu samayn karaa oonleena. Tababarka oonleena ah waa inay buuxshaa shuruudaha tababarka L&I.
Hurdo Badbaado leh	<ul style="list-style-type: none"> Samaynta tababarkan ayaa ahaan doonaa sidii hore: waxaa oonleen ahaan looga galayaa barta Tababarka ee DCYF. Waa inay maraan dadka ka shaqeeya barnaamijyada ruqsada u haysta daryeelka saqiirada. Ma buuxinaayo shardiga tababarka la cusboonaysiiyay ee adeeg bixiyaasha aan daryeelka siin saqiirada.
Tababarka Sanadlaha ah ee Caafimaadka iyo Badqabka	<ul style="list-style-type: none"> Adeeg bixiye kasta waa inuu maraa tababarka caafimaadka iyo Badqabka oo hal saac ah sanad kasta sida ku cad shardiyada federaalka (shardiga CCDF). Waxaa jiro sadex qaab oo loo sameeyo: <ol style="list-style-type: none"> Mid uun ka mid ah cusboonaysiinada kor ku qoran: Ka dooro qaybta 'Tababarada Caafimaadka iyo Badqabka ee Federaalka' oo ku jira barta tababarka DCYF. Dooro tababarkaaga aaga aad xirfada u leedahay V 'Caafimaadka, Badqabka iyo Nafaqada.'

Shaqaalaha Adeegyada iyo taageerooyinka Gaarka ah

Doorka	Shuruudaha
Adeegyada Gaarka ah <ul style="list-style-type: none"> Baxnaaniyaha Hadalka Shaqaalaha Barbaarinta Kubaca Taageerooyinka Kale ee IEP da 	Markaad adeegyo toos u siinayso cunug ku jira IEP ama Qorshaha Daryeelka Gaarka ah uuna jiro ogolaansho uu waalidku saxiixay oo ku aadan booqashooyinka kuna jira faylka cunuga, ma jiraan shuruudaha tababarka caafimaadka iyo badqabka oo u baahan inaad buuxiso.
Warbixinta Shaqaalaha Waxbarashada ee Oonleena ah (Maaha mid Is dheelitirid ah ama Mid aan La kormeerin)	Haddii xaruntaadu leedahay qof u yimaada taageerida waxbarashada oonleena ah aanana lagu tirin shaqaalaha carruurta uusan ahayn qof kaligiis ilmaha looga tago, waa in loo arkaa tabaruce marar dhifa yimaada umana baahna tababar.
Shaqaalaha Ku meel gaarka ah ee Shaqaalaha Lagu Tiriyo	Dhammaan shaqaalaha (xataa kuwa ku meel gaarka ah) ee lagu tiriyo shaqaalaha waa inay buuxshaan shuruudaha tababarka sida ku cad ruqsada WAC ee shaqadooda iyo heerka ay ilmaha la joogi karaan.

Oktoobar 21, 2020

Uqalmida iyo Taageerooyinka Adeeg Bixiyaha | oo Ay ogolaatay in La qaybiyo Diana Stokes